



VISITOR GUIDELINES



Qodobada booqashada bukaan-jiifka xiligga qaboobaha

Laga bilaabo bisha Nofeembare 13, 2018 ilaa ogeysiis danbe, waxaa la soo saaray qodobada booqdayaasha soo socda, si loo ilaaiyo bukaanada, qoysaska, booqdayaasha iyo shaqaalaha.

1. Mas'uuliyiinta sharciyaysan mar walba waa soo dhaweynaynaa umana aqoonsanin in ay yihiin "booqdayaal."
2. Wakhtiga booqashada dadka kale waa inta u dhaxaysa 8 subaxnimo iyo 9 fiidnimo.
3. Booqdayaalka, oo ay ka mid yihiin walaaluhu, ma ay booqan karaan, haddii ay leeyihiin qandho, qufac, cuno xanuun ama duuf.
4. Mas'uuliyiinta sharciyaysan oo ay ka muuqato astaamaha hargabku way booqan karaan, laakiin waa in ay xirtaan maaskaro.
5. Lama ogola booqashada ilmaha ka yar 5 sano.
6. Mas'uuliyiinta shaciyaysan iyo booqdayaalka waa in la baaraa caafimaad qabkooda maalin walba. Mas'uuliyiinta sharciyaysan iyo booqdayaalka waxaa la siin doonaa oo ay xiran doonaan aqoonsi cagaaran, hurdi ama guduud ah. Warqadahani waxay cadaynayaan:



Cagaar – Wuu booqan karaa, uma baahna maaskaro

Hurdi – Wuu booqan karaa, waa in uu xirtaa maaskaro



Guduud – Ma booqan karo qaybaha bukaan-jiifka, maaskaro waa in uu xirtaa

7. Lama ogola in ay booqdaan wax ka badan afar qof markiiba, kuwaasoo ay ku jiraan mas'uuliyiinta sharciyaysan, walaalaha iyo booqdayaalka kale.
8. Mas'uuliyiinta sharciyaysan iyo booqdayaalka aan wadan warqadda aqoonsiga, ma gali karaan qaybaha daryeelka bukaanka
9. Dhamaan mas'uuliyiinta sharciyaysan iyo booqdayaalka, waxaa laga rabaa in ay gacmaha ku nadiifiyaan barta caafimaad baaridda iyo ka hor inta aysan galin qolka bukaanka.
10. Mas'uuliyiinta sharciyaysan iyo booqdayaasha waxaa la fari karaa in ay xirtaan maaskarada inta ay joogaan isbitaalka.
11. Waxaad arkidoontaan shaqaalaha oo xiran maaskaro si ay isu badbaadiyaan una badbaadiyaan bukaanka.
12. Mas'uuliyiinta sharciyaysan iyo booqdayaalka waxaa laga codsankaraa in ay ka baxaan isbitaalka, haddii aysan raacin nadaamka booqashada ama aysan xiran maaskarada la faray.

13. Xaalado gaar ah awgood, waxaa suurto gal ah in la dabciyo nadaamka booqashada, haddii ay macquul tahay. Mas'uuliyiinta sharciyaysan waxay kala hadli karaan arintaan kalkaaliyaha ilmahaaga ama adeegaha bulshada.